Oslo

# Ku soo dhowaada iskoollada Oslo





# Ardayda cusub dhammaan soo dhowaada



Isniinta 18-ka ogoosto waxaa iskoolladeenna soo buuxin doona ardayda fasallada koowaad kuwaas oo iskoolka xiise badan u qaba.

Qaar baa rucleeya oo bood-booda oo waxay sugi la'yihiin inay iskoolka billaabaan. Qaar kalena waa yara welwelsan yihiin, oo laga yaabee inay bishinta hoose yara gariirayso. Maammulaha ayay carruurtu salaamaan, waxay na is bartaan macallinkooda, lana kulmaan ardayda kale ee fasalka.

Maalinta koowaad ee iskoolku waa maalin xusuus gaar ah u leh qoyska oo dhan, haddan nahay Iskoolka Oslana waxaan ku dadaalaynaa in uu ilmuhu helo billow fiican oo uu iskoolka jeclaado. Waxbarashada ayaan ardayda ku dhiirrigelin doonnaa oo ku guubaabin doonnaa. Shaqadayadu waa in aan arday kasta ka caawinno sidii uu dadaal dheeraad ah ula imaan lahaa, oo u dareemi lahaa in uu wax baranayo.

## Nasiib wacan baan idin rajaynaynaa billaabidda iskoolka!

# Fasalka koowaad maxay carruurtu ku bartaan?

Ardaydu waxay bartaan inay wadashaqeeyaan, inay is dhegaystaan, inay fikraddooda dhiibtaan iyo inay ahaadaan saaxiibbo fiican oo isku fasal dhigta. Waxaan wakhti badan ku bixinnaa inay ardaydu si fiican isu bartaan oo ay ammaanka isku qabaan.

Sanad-dugsiyeedyada ugu horreeya ayuu ilmahaagu baran doonaa akhriska, qorista iyo xisaabta. Dadka qofba si buu wax u bartaa, waxaanan ku dadaalnaa in siyaalo kala duwan dadka wax loo baro ayadoo ardayga wax loo barayo hab ardaygaas ku habboon. Waxbarasho kala duwan ayaa dugsiga laga bixiyaa, waxaanan adeegsan doonnaa hab dhigitaal ah iyo mid qalin iyo warqad la isticmaalayo labadaba.

Ciyaarta iyo waxbarashadu aad bay isugu xiran yihiin, waxaanan wakhti badan ku qaadannaa in aan ciyaarta dhexdeeda wax ku baranno. Habab badan oo kala duwan ayay waxbarashadu u dhici doontaa – ayadoo fasalku dhan yahay oo qolka fasalka la joogo iyo ayadoo arday yar lala joogo ama ayadoo safar luga-baxsi ah loo raacayo ardayda fasalkaas ah oo dhan. Macallimiintu ardayda oo dhan ayay si fiican u baranayaan, hadday ahaan lahayd waxa ay awoodaan, waxa ay xiiseeyaan iyo sida ugu fiican ee ay wax u bartaan.

# Maaddooyinka fasallada 1-aad

Manhajka waxbarashada ayaa qeexaya waxay ardaydu baranayaan. Ardaydu dhammaantood isku wax ayay baranayaan meel kasta oo ay dalka ku nool yihiin. Maaddooyinka soo socda ayay ardaydu dhiganayaan sanadka koowaad:

- Af-norwiiji
- Xisaab
- Saynis
- Af-ingiriis
- Cilmiga bulshada
- Farshaxanka iyo farsamada gacanta
- Muusigga
- Tababbarka jirka
- Masiixiyadda, diimaha, aragtida nolosha iyo



Iskoolku waa inuu ahaadaa goob u fiican ardayda oo dhan xag waxbarasho iyo xag bulsho labadaba. Macallimiintuna waa inay ardayda ka caawiyaan in ay fahmaan waxa laga doonayo inay bartaan, ayaga oo u sheegaya meelaha ay ku fiican yihiin iyo meelaha dadaalka dheeraadka ah uga baahan.

# U kuurgelidda ardayda

Labo tijaabo oo u kuurgelid ah ayaa laga qaadaa ardayda fasallada 1-aad. Mid waa akhriska, midna waa xisaabta. Tijaabooyinku waxay macallimiinta ka caawinayaan sidii ay ardayda wax ugu bari lahaayeen sida ugu fiican ee suurtaggalka ah.

Ardayda qaar baa laga yaabaa inay u baahan yihiin caawin dheeraad ah, meesha kuwa kale u baahan yihiin in cashirro dheeraad ah la siiyo.

Waxaad xaq u leedihiin caawin dheeraad ah haddii ay ilmahaaga ku adag yihiin akhriska, qorista, luuqadda ama xisaabta. Iskoolka ayaad la soo xiriiri kartaa, haddii aad welwel ka qabto inuu ilmahaagu ardayda kale ka danbeeyo. Iskoolka ayaa qiimayn doona waxa ugu wanaagsan ee loo qaban karo.



# Wadashaqayn wanaagsan waxay keentaa iskool wanaagsan

Waalidka ayaa muhiim u ah in ilmuhu iskoolka jeclaado. Waa muhiim in ay guriga iyo iskoolku si fiican u wadashaqeeyaan. Xiriirka fiican wuxuu abuuraa kalsooni, carruurtuna markay kalsooni qabaan oo faraxsan yihiin ayay si fiican wax u bartaan.

Macallimiintu waxay ka shaqeeyaan xoojinta wadajirka iyo inay carruurtu dhammaantood dareemaan inay fasalka ka mid yihiin. Adiguna wakhtiga firaaqada la yahay ayaad dhinacaaga wadajirka ka xoojin kartaa.

- Waxaan dadka oo dhan ku boorrinnaa inay carruurta ka wareystaan maalintooda iskoolka. Xiisahaaga maalintiisa iskoolka ayaa sare u qaadaysa niyadda uu iskoolka u hayo taas oo iyana keenaysa inuu iskoolka jeclaado oo waxbarashada ku fiicnaado.
- La soco ardayda kale ee fasalka. Carruurta u ammaan, macallinka iyo ardayda kale. Kalsooni ayay taasi ilmaha ku abuuraysaa. Iskoolka la soo xiriir haddii aad su'aal qabto ama haddii ay jiraan wax aadan nagu raacsanayn ama aad ka welwelsan tahay.
- Sanadka gudihiisa wuxuu iskoolku dadka ugu yeeraa shirar waalid, shirar waalidka gooni-gooni loo arkayo oo waxbarashada looga warrammayo iyo shirar kale intaba. Waxaa halkaas lagugu siinayaa warbixinta ilmaha ee xag waxbarasho iyo xag bulsho labadaba, adigoo fursad u heli doona inaad la kulanto waaliddiinta kale.
- Haddii aad doonayso inaad ka qaybqaadato sidii ardayda oo dhan loogu abuuri lahaa bey'ad iskool oo wacan, waxaad markaas noqon kartaa xiriiriyaha fasalka, ku biiri kartaa FAU ama kaalin kale buuxin kartaa ama ku biiri kartaa golayaasha iskoolka.



### Xiriiriyaha fasalka

Xiriiriyaha fasalku wuxuu muhiim u yahay sidii ay waalidka iyo macallinka fasalka mas'uulka ka ah si fiican ugu wadashaqayn lahaayeen. Billowga sanad-dugsiyeedka ayay waalidka fasalku hal ama labo waalid u doortaan xiriiriyaal fasal. Kuwaas oo mas'uul ka ah inay u dhexeeyaan waalidka iyo macallinka fasalka mas'uulka ka ah.

### Golaha fulinta ee guddiga waalidka (FAU)

FAU waxaa ku jira dad matala fasal kasta. FAU arrimo ayuu ka baaraan degaa isagoo matalaya waalidka, wuxuuna hoggaanka iskoolka kala shaqeeyaa waxyaalaha loo qabanayo bey'adda iskoolka.

# La soo xiriiridda iskoolka

Waxaa jira dhawr siyaalood oo aad iskoolka ula soo xiriiri karto. Bogga internetka ee iskoolka waxaad ka helaysaa warbixinta xiriirka ee dadka iskoolka jooga oo dhan. Waxaa kale oo aad halkaas ka helaysaa warbixinta waxyaalaha iskoolka lagu qabto. Haddii aad qabto su'aal la xiriirta maalin-dugsiyeedka ama aad doonayso inaad ogaato wax ilmahaaga toos u khuseeya, markaas waxaa wanaagsan inaad la xiriirto macallinka fasalka mas'uulka ka ah. Macallinka fasalka mas'uulka ka ah ayaa kuu sheegaya haddii loo baahan yahay in ay dad kale arrinta soo galaan. Dadkaasi waxay noqon karaan macallinka arrimaha bulshada, kalkaalisada caafimaadka, shaqaalaha wanaagga bey'adda ama qaar kale. Haddii aad qabto su'aal la xiriirta AKS, markaas waxaad la xiriiraysaa madaxa AKS. Haddii aadan hubin ciddii aad la hadli lahayd, markaas waxaad la xiriiri kartaa hoggaanka iskoolka.

# Nidaamka farriimaha iskoolka





Nidaamka farriimaha iskoolku waa nidaam uu iskoolka Oslo u isticmaalo isweydaarsiga warbixinnada iyo farriimaha ay isu diraan guriga iyo iskoolku. Sida waxyaalaha la qabanayo, jadwalka toddobaadka, warbixinnada shirarka waalidka iyo waxyaalo kale.

Nidaamka waxaad farriin ugu diri kartaa macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee iskoolka, waadna ugu jawaabi kartaa. Waxaad sidoo kale halkaas ku gudbin kartaa maqnaashaha, waxaadna ku arki kartaa liiska fasalka ilmahaaga.


Waxaa wanaagsan inaad liiskaan ku qorto meesha lagaala soo xiriiro karo. Maxaa yeelay waxay taasi fududaynaysaa wadashaqaynta waaliddiinta kale ee fasalka.

Abka Skolemelding kala soo deg App Store ama Google Play. Raadi "Skolemelding foresatte". Halkaan ayaad ka helaysaa wixii caawin ah ee aad u baahato:




# Iskoolka firfircoonida (AKS)


AKS waa deeq bilaash ah oo la bixiyo iskoolka ka hor iyo kaddib iyo fasaxyada. AKS waa nidaamka wakhtiga firaaqada ah ee iskoolka (SFO) ee Oslo. Ardaydu AKS wax bay ku bartaan, lana ciyaaraan carruurta kale ee iskoolka – waxaana halkaas la jooga dad waaweyn oo ammaan ah. AKS waxaa la furaa 1-da ogoosto, dhammaan ardayda fasallada koowaad na waa lagu soo dhowaynayaa. Qiimaha AKS wuxuu ku xiran yahay dakhliga waalidka. Dhammaan ardayda fasallada koowaad ee Oslo waxaa AKS laga siiyaa boos bar ah oo bilaash ah.




Iskoolkaaga la xiriir haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo sidii aad ugu biiri lahayd.

Halkaan uga biir AKS:







## Waxaa la rabaa iskoollada Oslo inay ahaadaan kuwo wanaagsan oo ammaan ah

Ardaydu dhammaan waxay xaq u leeyihiin inay xaalad fiican ku sugan yihiin markay iskoolka joogaan, maalin walbana waxaan ku dadaalnaa in ay maalinta iskoolka ee ardaydu ahaato sida ugu fiican ee suurtaggalka ah. Ardaydu waxay iskoolka kula kulmaan dad badan oo waaweyn oo ku cusub, sida; maammule, macallimiin, kalkaaliyayaal, shaqaalaha AKS, macallin arrimo bulsho iyo kalkaaliso caafimaad. Waxaa loo baahan yahay in dadka iskoolka ka shaqeeya oo dhan in ay la socdaan sida ay xaaladda ardaydu tahay.

Waa in iskoolku ka hortagaa dhibista «mobbing» oo baaritaan la sameeyo haddii laga shakiyo inay jiraan arday aysan maalintooda iskoolku ahayn mid wanaagsan oo ammaan ah. Iskoolka ayaad la soo xiriiri kartaa haddii ilmahaaga ama ilmo kale oo aad taqaanno uu iskoolka dhib ku qabo. Iskoolka ayaa ku caawinaya oo eegaya waxa arrintaas laga qaban karo.





# Warbixinno muhiim ah

- **Fasalkee ayuu ilmahaygu dhigan doonaa?**
  Dadka qaar baa intaan iskoolka la furin waxaa loo sii sheegaa fasalka uu ilmahoodu dhigan doono. Meesha ay iskoollada qaar toddobaadyada ugu horreeya ardayda kooxo u kala saaraan ka hor intaan fasallada la kala qaybin.

- **Goorma ayuu ilmuhu dabbaasha bartaa?**
  Barashada dabbaasha waxaa la billaabaa fasalka 3-aad. Si ilmuhu biyaha ula qabsado oo kalsooni ugu dareemo waxaa wanaagsan dabbaasha iskoolka ka hor inuu ilmuhu guriga ku tababbarto. Sida in biyo yar wejiga looga sayro ama biyaha hoostooda xumbo lagu sameeyo oo kale.



- **Iskoolladu dhammaantood waxay leeyihiin adeeg caafimaad**
  Dhammaan dadka ka shaqeeya adeegga caafimaadka waxaa saaran waajib xog-qarin. Adeegga caafimaadku ardayda oo dhan bilaash ayuu u yahay. Waalidka laftigoodu way la soo xiriiri karaan. Baaritaan ay dhakhtar iyo kalkaaliso caafimaad baarayaan ayaa loo fidiyaa ardayda fasalka 1-aad.




Arag afarta arday ee saaxiibbada ah ee isku fasalka ah iyo waalidkood:

# Jadwalka iskoolka ee 2025/2026


Maalmaha iskoolka iyo kuwa fasaxa nasashada ee iskoollada Oslo waa isku wada mid, ardayduna waxay iskoolka dhigtaan 190 maalmood halkii sanad-dugsiyeed ba.

2025

- Maalinta koowaad ee AKS: jimco 1-da ogoosto
- Furitaanka iskoolka: isniin 18-ka ogoosto
- Isniin 8-da sibteembar waa fasax: Doorashada baarlammaanka
- Fasaxa dayrta: isniin 29-ka sibteembar – jimco 3-da oktoobar
- Fasaxa ciidda masiixiga: isniin 22-ka diseembar – jimco 2-da jannaayo 2026

2026

- Fasaxa qaboobaha: isniin 16-ka febraayo – 20-ka febraayo
- Fasaxa ciidda booskaha: isniin 30-ka maarso – 6-da abriil
- Jimcada 1-da maajo waa fasax: Maalinta shaqaalaha adduunka
- Khamiista 14-ka maajo waa fasax: Ciid masiixi
- Isniinta 25-maajo waa fasax: maalinta 2-aad ee ciidda biinsaha
- Maalinta iskoolka ugu danbaysa fasaxa xagaaga ka hor: jimco 19-ka juun
- Iskoolka xagaaga ee Oslo: fasaxa xagaaga ee iskoolka





Degmada Oslo
Waaxda waxbarashada
Iskoolka Oslo
Furitaanka iskoolka ee 2025

Qaabayn: Janne Dahl
Sawir: Heidi M. Skjebstad, Pernille Ø. Fjeld
Sawir-gacmeedka: Barbro Barosen